



Xaashida Xaqiiqada AMAANKA ee gubashada hore

Sida waalidiinta iyo daryeelbixiyayaashu uga hortagaan ku gubashada dabka iyo dhaawaca dabka

Waalidiinta iyo daryeelbixiyayaashu waxay u baahan yihii inay ogaaadaan in carruurta yaryari wax u maleeyaan una dhaqmaan si ka duwan dadka waaweyn. Tusaale ahaan, haddii dab dhaco, waxay u badan tahay inay dhuuntaan halkii ay ka carari lahaayeen. Waana masuulyada dadka waaweyn inay sii saadaaliyaan khatarta.

Kormeer carruurta waqt walba

Dhaawacyada badankood waxay dhacaan waqtiyada hawlmaalmeedku socdaan waxayna ka dhacaan guriga agtiisa. Shilalka qaarkood waxay dhacaan marka carruurta aan la kormeerayn. Waalidiintu waa inay joogaan xaallad kasta oo jirta meel kasta iyo mar kasta oo ay dhici karto gubasho iyo dhaawac dabeed.

Dabeeecada amaanka dabka waxay ku xiran tahay:

- Ogaanshaha khatarta iyo garashada wixii la samaynayo si hoos loogu dhigo khatarta
- Kormeeraida wanaagsan oo carruurta
- Doorka wax ku oolka ah ee hagida waalidka/daryeelbixiyayaasha
- Xakamaynta khatarta ee Waalidiinta/daryeelbixiyayaasha

Fahmida xiisaynta carruurta ee dabka

Carruur badan ayaa muujisa danaynta dabka waqt hore. Waxay muujin karaan su'aallo ku saabsan dabka, waxay ku cayaaraan gaymamka sida 'mala awalka cunta-karinta', ama cayaarida doorka dabdamiyayaasha. Waxyallaha ugu badan oo muujiya danaynta dabka waa ku dhowaanshaha ama daawashada dabka, shidida dabka ama weydiisashada caawimida dabka ama hulcinta dabka ama shumuca (candles).

Carruurta qaarkeed, xiisayntaasi waxay u keeni kartaa inay ku cayaaraan dabka (shidida kibriitka ama laytarka sigaarka lagu daaro) ama shidaan dabka. Xarakaadkaasi wuxuu ilmaha iyo qoyska istaajiyaa boos halis khatar ah. Dab badan oo guryaha ka dhacaa wuxuu keenaa dhimashada carruurta.

*Ka taxadarida khatarta gubashada, dhaawaca dabku keeno iyo dabka talaabo
ayaad ka qaadi kartaa si aad uga hortago dhaawaca iyagana u difaacdo.*

Macluumaad intas ka badan:

Kidsafe

www.kidsafevic.com.au

Royal Children's Hospital

www.rch.org.au

Macluumaad intas ka badan la xiriir:



www.cfa.vic.gov.au



www.mfb.vic.gov.au



Country Fire Authority (CFA) iyo Metropolitan Fire and Emergency Services Board (MFB) ayaa waxay ka dhigileen macluumaadkaan mid la heli karo iyada oo fahamku yahay inaad aad uga taxadarato markaad istiqmaaleysa. Haddii aad wax staki an ka qabto sida uu saarnayayo istiqmaalkani xeeladdata gaarka ah, waa maad raaduska talo minnaadeed oo intas ka badan. CFA iyo MFB ma aad bayaan masuulyaca sidaa sida loo qalad ah oo ka yittimaadkaan, ha u nqoto qalad dan looga jeedin, qalad ama wax laga tegay ama sabab kale oo kasta